

Ballaarinta tallaalka 'KOOFID-19' ee Alberta

19ka Febraayo 2021

In kabadan 1.79 milyan oo reer Alberta ah ayaa heli doona talaalka KOOFID-19 gugga gudahiisa iyadoo la raacayo Wajiga 2 ee istiraatiijiyadda qeybinta tallaalka Alberta.

Wajiga labaad ee tallaalka waxaa lagu bixin doonaa qaab habaysan oo markii la dhammeeyo, la tallaali doono qof kasta oo da'diisu tahay 50 illaa 74 sano jir, qof kasta oo qaba xaalad caafimaad oo khatar sare leh, Dadkii Hore (First Nations) iyo dadka Métis oo da'doodu tahay 35 iyo ka weyn, dadka degaanka (residents) iyo shaqaalaha isku uruurinaya goobaha nolosha, iyo daryeel bixiyaasha xaqqa u leh.

Wejiga 2-aad waxaa la beegsanayaa inuu bilaabmo bisha Abriil, iyadoo ku xiran tahay bixinta tallaalka.

“Dib u soo saarista tallaalka Alberta waxay had iyo jeer mudnaanta siisaa dadka halista ugu badan ugu jira KOOFID-19 iyo Wejiga 2-aadna waxba kama duwana. Waxaan dhageysanay talo ka timid khabarada caafimaadka bulshada iyo Kooxaha Howlgalka Tallaalka si loo ogaado kuwa halista ugu jira ee reer Alberta. Markuu dhamaado wajiga 2aad, 1.79 milyan tallaalka KOOFID-19 oo dheeraad ah ayaa reer Alberta heli doonaan, waxaan awoodi doonnaa inaan u dhaqaaqno tallaalka dadweynaha guud. Gobolkeennu wuxuu diyaar u yahay inuu reer Alberta ka tallaalo garbaha sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. Si kastaba ha noqotee, tani waxay ku tiirsan tahay Alberta inay ka hesho Ottawa tallaalka sax ah waqtigeeda. Waxaan uga baahan nahay dowladda federaalka inay joojiso dib u dhaca si aan howsha u qabanno.”

Jason Kenney, Gudoomiyaha

“Barnaamijka gaarsiinta tallaalka ee Alberta wuxuu ka mid yahay kuwa ugu fiican wuxuuna sii wadi doonaa kor u qaadista maaddaama aan helno saad badan. Tallaalka badan ee imanaya Alberta, wuxuu nasiin doonaa awood si dhakhsi ah ugu gaarno Wajiga 2 oo aan u bilaabno, loona tallaalo dad badan oo reer Alberta ah. Musiibada wali ma dhamaan, laakiin waxaan si joogto ah u dhiseynaa difaaceena ka dhanka ah.”

Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka

U qalmitaanka Wejiga 2 wuxuu ka guuri doonaa Kooxda A una guuri doonaa Kooxda D:

- Kooxda A waxaa ku jira:
 - Dadka reer Alberta da'doodu tahay 65 ilaa 74, meel kastoo ay ku nool yihiin.

- Dadkii Hore (First Nations) iyo dadka Métis ee da'doodu u dhaxeeyso 50 ilaa 64, ee ku jira xeryaha ama banaankeeda jooga ama xeryaha dad Metis ka ah.
- Shaqaalaha xarumaha caawinta nolosha ee shatiyeysan oo aan ku jirin Wajiga 1.
- Kooxda B waxaa ku jira:
 - Dadka Alberta da'doodu tahay 18 ilaa 64 oo leh halis caafimaad. xog dheeraad ah oo ku saabsan xaaladaha gaarka ah ayaa la bixin doonaa ka hor Bilowga Wajiga 2.
- Kooxda C waxaa ku jira:
 - Dadka deegaanka iyo shaqaalaha u qalma ee goobaha nolosha. Tan waxaa ka mid ah xarumaha dhaqan celinta, hoyga dadka hoy la'aanta ah, iyo guryaha kooxaha, oo ay ku jiraan naafonimada, caafimaadka maskaxda iyo noocyo kale oo taageero shati leh.
 - Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee bixiya daryeelka bukaanka ee tooska ah iyo kuwa daran oo leh awood faafin sare oo ah u gudbinta dadka halista badan leh.
 - Daryeelayaasha Albertans ee halista ugu badan ugu jira natiijooyinka daran.
- Kooxda D waxaa ku jira:
 - Dadka Alberta da'doodu tahay 50 ilaa 64, meel kastoo ay ku nool yihiin.
 - Dadkii Hore (First Nations) iyo dadka Métis ee da'doodu u dhaxeysa 35 ilaa 49 sano ku jira xeryaha ama banaanka jooga ama degsiimooyinka dadka Metis ka ah.

Xog faahfaahsan oo ku saabsan sida ay xaq ugu leeyihiin dadka reer Alberta inay u helaan tallaalka ayaa la sii dayn doonaa ka hor tallaabo kasta oo Wajiga 2 ah. Waqtiga la bilaabayo weji kasta wuxuu ku xiran yahay bixinta tallaalka iyo helitaanka. Alberta waxay ku tiirsan tahay inay u qaybiso tallaalka gobolka dowladda dhexe.

Ka shaqee sidii loo aqoonsan lahaa dhamaan isku xigxiga kooxaha kale ee hada socota.

Dhammaan dadka la tallaalay waxaa laga filayaa inay sii wadaan inay raacaan tilmaamaha caafimaadka iyo xaddidaadaha.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka oo tilaabooyin sax ah loo raacyo, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xog la xiriirta

- Tallaalka KOOFID-19 ee Alberta ([COVID-19 vaccine in Alberta](#))

Warbaahinta kala duwan

- Daawashada shirka warfaafinta ([Watch the news conference](#))
- Daawashada sawirada dhacdooyinka (waxaa la heli doonaa dhacdada kadib) ([View the event photos](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>